

Ka fiirso intaadan wax-falin ee raadi gargaarka aad heli karto sida:

- Bulshada iyo waayeello dhex-dhexaadiyayaal ah
- Qaraaba sokeeye ee dhex-dhexaadiyayaal ah
- Imaamka ama maamulaha meelaha lagu Rabbi tuugo
- Qof kuu dhow oo aad ku sir qarsato ama saaxiib
- Sharciyada Canada aqoon fican u yeelo
- Ka-talo raadso facaaga ama jiilkaaga

Cadaadis Ka-xuroow

www.blainn.cc/abuse-free

Kani waa koox online iskooda isu tageera si aay uga soo kabsadaan cadaadis kaga yimaad lamaanaha ay ka midka yihiin.

Ururka La-taliyayaasha Ragga Cadaadiyaha Ah ee B.C.

1 (800) 360-8315

Kani waa xiriirka la-taliyayaasha la shaqeeya ragga ku ah cadaadiye calaaqaadka ay la leeyihiin dadka.

CAMH Xarunta Mukhaadaraadka & Caafimaadka Maskaxda

1 (800) 463-6273 / www.camh.net

John Howard Society of Canada

1 (613) 384-6272 / www.johnhoward.ca

Kani waa hay'ad macaash la'aan ku shaqeeya waxayna laama ku leedahay Canada oo dhan. Mabda'a hay'addani waa inay caawinto ragga qaankaarga ah ee dhibaataada ka hay-sato sharciga iyo/ama aay soo hayso qatarta.

Caddeyn: Warsidahan wuxuu xambaarsanyahay oo keliya macluumaad guud ee ma aha mid beddeli kara tala-bixin sharci ah ee khuseeya xaaladda aad ku sugantahay.

Mashruucan waxaa si sharaf leh u maalgeliyay Citizenship and Immigration Canada

Citizenship and Immigration Canada ayey sharaf u tahay curinta brojetkani.



Family Service Toronto waxay uga mahad celinayasaa wax wada-qabadki aay bulsha ahaan la wadaageen Rexdale Women's Centre ee Toronto iyo North Star Immigration Consulting ee Ottawa.



PHOTOGRAPHY:
FATAH MUSE
USED UNDER A CREATIVE COMMONS LICENSE.

SOMALI MEN

Haddaan ogaan lahaa keliya... ma noqdeen nin dhibaataada sii-wada

Rag kala hadlaya rag kale is-dhibaateynta qoyska



Akhri si aad u aqoon kororsato... warsidahan wuxuu kuu suurta gelinaya inaad hesho macluumaad iyo tab aad uga hor tagto is-dhibaateynta qoyska.

Bulsho Soomaaliyeed ayaa u soo diyaariyay warsidahan bulshadooda Soomaaliyeed iyagoo kaashaday wada shaqeyn iyo munaaqashooyin ahmiyad leh iyo u kuur galid macluumaadka shabakadda intarneet-ka Caddaalad Canada (Canada Justice).

Ma dhibaateysaa dadka aad jeceshahay?

Dhibaato miyaad kala kulantaa in aad ula qabsato hab nololedka Canada?

Is-af-garashowaa miyaa idin dhexmara adiga iyo xaaskaaga?

Tusaale wanaagsan miyaad u tahay carruurtaada?

Baqdin miyaa kaa haysata inaad lumiso qoyskaaga?

Warsidahan wuxuu xambaarsan yahay warbixin ku saabsan CADAADISKA iyo natiijada ka imaan karta marka lagu mashquulo dhaqanxumo leh ixtiraam la'aan, dad danqin iyo qoys burburin.

Warsidahan wuxuu kuu sahlayaa inaad hesho macluumaad iyo ilo xog-leh oo kaa caawina sidaad uga hortagilahayd cadaadis iyo is-dhibaateynta qoyska ama aad gargaar u raadsan lahayd.



Noocyo Cadaadis

1. Cadaadis jir-dil
2. Cadaadis galmo iyo ka faa'iidayasho galmo la isu isticmaalo
3. Dayacid
4. Cadaadis nafsiyan iyo dareen-danqis
5. Cadaadis dhaqaale iyo maaliyad

Xeerka Dembiyada ee Canada wuxuu qe-exayaa sharci ahaan natiijada ka dhalan karta dambiyada cadaadiska qaarkood sida gacan-saar, kufsi iyo dembiga isku-xadgud-gubka ah.

Sanadahan dambe, Xeerka Dembiyada waxa lagu kordhiyey is-beddelo dhowr ah oo adkeeynayo sharciyada la xiriira cadaadiska lamaanaha is qaba. Waxa intaasi dheer gobollo badan ayaa meel-dhigtay sharciyo khaas u ah is-dhibaateeynta qoyska kuwaasoo sii kordhiyay tabaha difaacyada sida ka-hortag deg-deg ah ee dhibbanaha ka joojiya cadaadiska. Sidoo kale, waxa la fuliyay tallaabooyin banneeynaya in booliiska meelkasta uu maamulkan ka joogo kusoo oogikara dembi cid kasta ee dhibkasi geysta.

Warar intaa ka tifaftiran, fadlan la xiriir websaayt-ka Caddaalad Kanada:

<http://www.justice.gc.ca/eng/pi/fv-vf/about-aprop/index.html>

Dembiyada Dacweyn Keeni-kara

Xeerka Dembiyada ma laha gefaf u khaas ah “ku-xadgudubka qoyska”. Hase yeeshee, qofkii wax cadaadiya waxa lagu qaadi kara dacwad ayadoo loo cuskanayo Xeerka Dembiyada sida hoos ku qoran:

- Xadgudub jirka wax-yeelleeyo
- Xadgudub galmo ama galmo hub loo isticmaalo
- Xadgudub galmo jirka wax-yeelleeyo
- Xadgudubka u-gabbasho si qof loo wax-yeelleeyo
- Hanjabaad lagu dhawaaqo, ka beensheegid ama cabsi gelin
- Ku xad gudub awaamirta maxkamadaha
- Isku dayid dil ama dil naf-goyn ah

Cawaaqibxumo Ka Imaan-kara

- Mashaakil lagala kulmo sharciga (dembiilenimo in lagu diwaan geliyo)
- Shaqa la'aan dheerata (qoyska oo loo awoodin waxay rabaan)
- Qoyska oo kala guura ama furitaan dhaco
- Ixtiraamka aad ku lahayd bulshadaada dhexdeeda oo kaa dhuma
- Laga yaabee carruurta ineey adiga kaa barato xadgudubka
- Inaad is-disho, wax-yeellayso qoyska ama naftaadaba ay suurtagal tahay
- Walaac, murugo iyo in lagu musaafuriyo

Dabeecadaha Cadaadiska

- Maan-dooriyayaal sida khamriga, qaadka iyo daroogada oo aad badsataa waxay keeni karaan dabeecad leh gardarraysi
- Ineey kaa muuqato naxariisdaro, daryeel la'aan, xukun-jacayl qoyskaaga
- Hanjabaad inaad dhaawacayso qoyskaaga ama naftaada ee la timaad
- Xaaskaagoo liiddo, xaqirto ugu hanjabto inaad ka tageyso haddi ayan ku adeecin
- Inaad dayacdo baahida qoyskaada
- Inaad xaaskaaga ku keliyeeyso mas'uuliyadda korinta carruurtiina
- Inaad go'aamiso xalka arrimaha qoyska adigoo kala tashan xaaskaaga
- Cabsi aad geliso xaaskaaga adigoo u muujinayo xanaaq iyo ixtiraam darro
- Xaaskaaga aad ku khasabto galmo ineey kula sameyso
- Inaad xaaskaaga u diido ineey aaddo dugsi ama aay yeelato xirfad shaqo
- Inaad xaaskaga ku cadaadiso arrimaheeda u gaarka ah sida dokumentigeeda sharciga, maaliyad ama waraaqaaha socdaalka warqadaheeda, email-ladeeda isla markaana ilaaliso sheekadeeda taleefoonka oo aad kor meerto adigoo fasax ka haysan

Waa Goor Is-beddel Dhaco.

Waa Goor La Joojiyo Dhibka!

Dabeecadda cadaadiska waa wax la door-bido. Dhaqdhaqaaqyada dembiilaha sameeyo ma aha mid si kam'a ku dhaco. Maadaama cadaadinta ay tahay wax la door-bido dembiilaha wuxuu dooran karay inuusan dad cadaadin. Dabeecadda cadaadinta waa mas'uuliyadda keliya ee cadaadiyaha. Ma jiraan wax dhibbanaha uu sameeyo ee keeni kara ama kordhinkara dabeecadaha cadaadinta. Marna ceeb ma aha in gargaar la weydiisto.

Gabay Soomaali

*Rag waa nimanka xaasaskooda
u dabacsan ee daryeela*

*Waa xurmo saafi ah oo naxariis leh
...ha dhibaateyn*

Si naxariis leh u xajji

Xarrago kula soco

*Kii aan nabad kula dhaqmin...
dhibaata u dambeeysa*

*U hoggansan xeerka yaadan xabis ku
dambeynina*

**Oraahyo hiddo iyo caado ah
SAWIR/MUUQAAL**

Khadka Taleefoonka ee Nabad-gelyada Waayeelka

1 (800) 299-1011

Waa khad taleefoon loogu talo galay gargaarka waayeelka halista ugu jira in la cadaadiyo. Macluumaad, tilmaamo iyo taageero aad heli karto 24ka saac maalinti-iba iyo toddobada maalmood ee asbuuca, iyado isla markaas laga heli karo in ka badan 150 afaf ee kala duwan.

Ururka Waayeelka ee Magaalo weynta Edmonton (SAGE)

1 (780) 454-8888

Kani waa urur war-bixin iyo taageero khad taleefoon siiya waayeellada la cadaadiyay, qoysaskooda iyo saaxiibadoodaba.

Waliga iyo Ammaano-hayaha Shacabka ee Biritish Kolombiya

1 (604) 660-4444

Waxay badbaadiyan xuquuqda sharciiyeysan iyo walafka maliyadeed qof kasta oo u baahan taagero si uu go'aan uga qaato arrimo la xiriira shaqsiyaddiisa ama arrimo maaliyad la xiriira.

Ligne Aide Abus Aines

1 (888) 489-2287

Hay'addan xarunteeda waa Montreal, Quebec adeegyadedana waxaa ka mid ah iney dadka taagta daran siiyaan taageero/magan-gelyo.

Caddeyn: Warsidahan wuxuu xambaarsanyahay oo keliya macluumaad guud ee ma aha mid beddeli kara tala-bixin sharci ah ee khuseeya xaaladda aad ku sugantahay.

Mashruucan waxaa si sharaf leh u maalgeliyay Citizenship and Immigration Canada

Citizenship and Immigration Canada ayey sharaf u tahay curinta brojektani.



Family Service Toronto waxay uga mahad celinayasaa wax wada-qabadki aay bulsha ahaan la wadaageen Rexdale Women's Centre ee Toronto iyo North Star Immigration Consulting ee Ottawa.



PHOTOGRAPHY:
ISTOCKPHOTO AND STEVE EVANS
(USED UNDER A CREATIVE COMMONS LICENSE)

SOMALI SENIORS

Haddaan ogaan lahaa keliya...

Waayeello kala hadlaya waayeello kale is-dhibaateynta qoyska



Akhri si aad u aqoon kororsato... warsidahan wuxuu kuu suurta gelinaya inaad hesho macluumaad iyo tab aad uga hor tagto is-dhibaateynta qoyska.

Bulsho Soomaaliyeed ayaa u soo diyaariyay warsidahan bulshadooda Soomaaliyeed iyagoo kaashaday wada shaqeyn iyo munaaqashooyin ahmiyad leh iyo u kuur galid macluumaadka shabakadda intarneet-ka Caddaalad Canada (Canada Justice).

Kali ahaansho ma dareentaa? In lagu dayacay ee xubnaha qoyskaaga ku cidleyeen ma dareentaa?

Daryeelahaaga ama/iyo carrurtaadaba ma ku dandarreeyaan?

Ma laguugu yiraahdaa awood uma lahid inaad danahaaga keligaa go'aansato?

Daryeelahaaga miyuu kuugu xukumaa lacagtaada aad kharajgareeyneeysa si uu u xaddido awooddada dhaqaale?

Carruurtada ma kuugu hanjabaan inay kuu dirayaan guryaha waayeelka lagu xannaaneeyo mana kuugu hanjabaan iney kaa tegayaan?

Ma dareentaa in carrurtaada/daryeelahaaga aay ka faa'ideysanayaan kartidaada xaddaadan ku hadlidda afka qalaad?

Warsidahan wuxuu xambaarsan yahay macluumaad muhiim ah oo ku saabsan Wayeel Cadaadis. Baro xuquuqda aad leedahay iyo sida uu sharciga Kanada kuu daafici karo.



Cadaadinta waayeelka waxa lagu tilmaami kara “fal mar keliya ah, ama falal is daba jog ah, ee ka dhex dhici kara qaraabo kasta ee laga filayo kalsooni ineey ka dhaxeeyso ee laga yaabo ineey u keento dhibaato ama saxariir qofka waayeelka ah”. Waayeel cadaadis wuxuu ku imaan karaa siyaaba kala duwan sida jir-dilka, dareen nafsaani ah, fara xumayn iyo xaq dhowr la’aan dhaqaale. Siyaabo badan ayaa jira oo lagu danqin karo dareenka qofka waayeelka ah ha ahaato si ula kac ah ama si kama’ ah, iyagoo lagu cadaadiyo hadal meel ka dhac leh iyo cadaadis maskax ahaan iyo jir ahaanba. Dabeecadda cadaadinta waxay ka dhex dhici karta guryaha waayeellada ama xiriir ay wadaagaan saaxiibbadda.

Waayeel cadadin ma bannaana ee marnaba ha u dul qaadan maxaa yeelay adiga ma tihid sababta dhibaataayntaada u dhacday.

Naftaada ha eedeyn.

Ma aha inaad dhibbane u noqoto dabeecad xumada cadaadiyaha.



Noocyada Cadaadiska

Cadaadis Jir-dil ah:

- Garaacid, gacan qaad, dibindaabyo
- Gil-gilid, dharbaaxayn, riixid
- Ceejis, qaniinid, haraantien
- Hub ku weerarid iyo xoog ku-hayn

Cadaadis Nafsaani iyo Dareen-danqis:

- Dhaq-dhaqaajin lacageed oon oggolaan-sho loo haysan
- Bankiga oo xisaab wadaag laga furo adigoon rabin
- Iyadoo laga haysto gunnada waayeelka, lacagaha curyaanka, ama wax kasta oo ku saabsan taageero maaliyadeed
- In laga xado waxyaabaha qeymaha badan sida majowharaad, lacagtaada iyo wax kasta oo qeymo maaliyadeed leh
- In khasb lagaaga gado hantidaada, ama saxiixdo jeegaggaada iyo dokumen-tiyo kale

Cadaadis Nafsaani iyo Dareen-danqis:

- In lagu baado ee laguugu handado joojin hawlaha la xiriiro dhoofkaaga
- Hanjabaad dalkaa lagaa musaafurinaya ama qiime ma lihid
- In lagaa qeyb gelin waayo talooyinka qoyska la xiriira
- In lagu cidleeyo ee la xaddido isticmaaliddaada adeegyada
- Carruurta qoyska ee lagu dhiirri geliyo ineey ku ixtiraamin
- In lagu maadeysto meesha jirkaaga la’yahay ama cayaar laga dhigto
- In lagu diido xiriirnta xubnaha qoyskaaga aad kaga soo dhooftay
- Gooddin baqdin gelin leh ama laguugu cadaadiyo diintaada

Xusuus loogu tala galay Daryeelayaaha:

Waayeelka waa saldhigga bulshadeena. Mas’uuliyadda kaa saran daryeeliddooda waxay kula soconaysa ilaa aad qabri ka gasho. Waayeellada dadka caadadiya naftooda ayeey saxariiriyaan.

**Oraahyo hiddo iyo caado ah
SAWIR/MUUQAAL**

World Health Organization:

http://www.who.int/ageing/projects/elder_abuse/en/index.html

Ka firso intaadan wax-falin...

Qorsheyn Nabad-gelyo:

1. Xaaladdada uga xog-warran qof aad ku kalsoon tahay oo ku wax qarsato
2. Haddad u baahato caawinaad weydiiso saaxiibkaaga, deriskaaga ama qaraabadaada.
3. Haddii nabad-gelyadada qatar ku jirto wac 911 oo weydiiso gargaar.
4. Tag meel kasta aad aad ku nabad-geleyso, sida guriga deriskaaga, meelaha kuu dhow ee ururrada bulshada ama meelaha Rabbi tuugga.

Ilo Xog-leh

Weydiiso turjumaan af Soomaali si aad caawinaad ugu hesho waxaad ka rabto ilahan xogta leh.

Xiriirka Kanada Ka-Hortagga Cadaadiska Waayeelka

www.cnpea.ca

Ujeeddada sayt-kani waa ineey dadka awood u helaan ineey ogaadaan ama ka caawinto sida ay u wadaagi lahaayeen war-bixinnada ku saabsan cadaadiska iyo daya-caadda marka la waayeelobo timada, iyo sida loo ogaan karo hawlgallada laga wado Canada si xal loogu helo mashaakilladan ee wada quseeya bulshada, caafimaadka iyo sharcigaba.

Haddaad Qatar Deg-deg Mudan Ku Jirto:

1. Wac **911** gargaarka booliska. Sheeg luqada aad ku hadasho, waxay kula xiriirin karaan qof kuu tarjuma ama waxaad tiraahdaa **"HELP"** I-caawin.
2. Tag meel aad nabad-gelyo ku helieyso, sida maktabadaha dadweynaha ama tukaan macdaar ah.
3. La hadal qof aad ku kalsoon tahay, sida dhakhtarkaaga, macallinka ESL ama af Ingiriisiga, goobta aad ku Rabbi tuugto, woorkarkaada caayrta, qof saaxiib ah, qof qaraabo ah, qof deris ah ama qof u shaqeeyo bulshadaada.

Ilo Xog-leh: Weydiiso turjubaan af Somali kaa caawimo ilahan xogta haya.

Health Resource Center on Domestic Violence

1 (888) 792-2873

National Center for Victims of Crime Stalking Resource Centre

1 (800) 394-2255

National Sexual Assault Hotline

1 (800) 299-1011

Shelternet for Abused Women

1 (866) 693-3318 / www.shelternet.ca

Shelternet waa online-ka Kanada oogu horreeyey aan mid la mid ahna jirin ee ku hawlan ilo-xog-uruurin iyo taageero xiriirinta dumarka la cadaadiyay, carruurtooda iyo hoyga ku meel gaarrada ah ee iyaga u adeega.

Caddeyn: Warsidahan wuxuu xambaarsanyahay oo keliya macluumaad guud ee ma aha mid beddeli kara tala-bixin sharci ah ee khuseeya xaaladda aad ku sugantahay.

Mashruucan waxaa si sharaf leh u maalge-
liyay Citizenship and Immigration Canada

Citizenship and Immigration Canada ayey
sharaf u tahay curinta brojetkani.



Family Service Toronto waxay uga
mahad celinayasaa wax wada-qabadki
aay bulsha ahaan la wadaageen Rexdale
Women's Centre ee Toronto iyo North Star
Immigration Consulting ee Ottawa.



PHOTOGRAPHY:
FLICKR USERS PHOTOTEACHER_WEST AND IRIN_PHOTOS.
USED UNDER A CREATIVE COMMONS LICENSE.

SOMALI WOMEN

Haddaan ogaan lahaa keliya...

Dumar uga hadlaya dumar kale is-dhibaateynta qoyska



Akhri si aad u aqoon kororsato...

warsidahan wuxuu kuu suurta gelinaya
inaad hesho macluumaad iyo tab aad uga
hor tagto is-dhibaateynta qoyska.

Bulsho Soomaaliyeed ayaa u soo diyaariyay
warsidahan bulshadooda Soomaaliyeed
iyagoo kaashaday wada shaqeyn iyo
munaaqasho ahmiyad leh iyo u kuur galid
macluumaadka shabakadda intarneet-ka
Caddaalad Canada (Canada Justice).

Arrimahan miyeey kuugu dhacaan?

Miyaa lagu garaacaa, dharbaaxyeeyaa ama
lugu kadeedaa?

Miyaa lagu caayaa oo lagu sharaf-rida
caruurtaada iyo qaraabada hortooda?

Awoodda miyaa lagaa qaaday inaad u gacan
bannaanaato guriga aad ku nooshahay
dakhligiisa?

Ninkaaga makuugu hanjabaa inuu kaa
tagayo haddii aad adeeci weyso?

Adiga oo aan oggoleyn ma laguugu khasbaa
inaad galmo la yeelato?

**Haddii aad dabecadahan mid ka mid ah la
kulantay, waxa lagula talinaya inaad raadsato
gargaar sababtoo ah waxa dhici karta inaad
ku jirto xiriir cadaadis wato, ama inaad
halis u tahay in lagu cadaadiyo. Warsidahan
wuxuu xambaarsan yahay macluumaad
muhiim ah ee ku saabsan CADAADISKA, iyo
waxa aad ka sameyn karto si add naftaada u
badbaadiso ama aad gargaar u raadsato.**



Dawladda Canada maxay ka sheegtay Is-Dhibaateynta Qoyska?

“Is-dhibaateynta Qoyska” waxa ka mid ah noocyo badan ee cadaadis ah kuwaaso carruur iyo qaangaarba kala kulmi karaan gurigooda dhexdiisa. Cadaadis waa qof, rag ama dumar, u awood sheegto qofka kale si uu u xukumo.

Dhibbanayaasha waxay xaq u leeyihiin iney booliska u yeeraan haddi ay la kulmaan cadaadis. Mar hadduu booliska soo dhexgalo, dhibbanaha ma joojin karo dembi-baarista socota, dacwadana kama laaban karo mana codsan karo in lasoo ga-bagabeeyo hawlaha arrintooda ku saabsan ee maxkamadda hor taala. Booliska wuxuu awoodi karaa inuu xiro, hayo kuna soo oogo cadaadiyaha dembi kasoo horjeeda sharciga.



Cadaadiye waa la dacweynkaraa haddu sameeyo

Waxyeelayn Jir-dil ah:

Sida: Garaacid, gacan qaad, dibindaabyo, qaniinid, gil-gilid, dharbaaxayn (iwm.)

Cadaadin Nafsaani iyo Dareen-danqis ah:

Sida: Reerkaaga, asxaabtaada, dadkaad wada shaqeysaan, carrurtaada laguugu hor sharaf-rido; niyadda oo laga jebiyo, cilmi malihid oo af Ingiriisna ma taqaanid lagu yiraah (iwm.)

Takoovid iyo Dayacaad:

Sida: dhaqankaaga iyo hiddahaagaba waad ka tagtay laguugu xumeeyo; in lagu xaddido xiriirinta saaxiibadaada iyo qaraabadaada; masayr lagu tilammo dabeecad-xumada laguula dhaqmo (iwm.)

Cadaadin Dhaqaale iyo Maaliyad:

- In lagu diido inaad shaqeysato, arrimaha dhaqaale waxba aadan ku darsan karin ee laga ceshto dakhliga qoyska soogala; in lagaa gato alaab qaali kuu ah adigoon oggolaansho lagaa helin

Carruurta oo Lagu Isticmaalo:

- In laguugu hanjabo in carrurta lagaa qaadayo dib loogu celinaayo waddanki
- Carrurta oo laga dhaadhiciyo inay kugula dhaqmaan ixtiraam la'aan

Xuquuqda Dumarka

1. Sharciga Canada wuxuu qeexayaa in dumarka leeyihiin aqoonsi sharciyeed, xuquuq iyo fursado u dhigma kuwa ragga. Is-dhibaateyn lagu sameeya dumarka waa mid ka soo horjeeda sharciga. Dumarka la cadaadiyo waxay dalban karaan hooy aay ayaga iyo caruurtoodaba si ku meel gaar ah ay usii degaan. Waxaay kaloo xaq u leeyihiin inay ka helaan magan gelin dhanka sharciga iyo badbaadin nabad galiyo.
2. Qof dumar ah oo guur cadaadis leh kasoo carooto waxaa u bannaan inay dawladda ka hesho taageero dhaqaale. Haddii uu cadaadiyaha ahayn qof jinsiyaddiisa Canadiyan tahay, isla markaasina lagu xukumo inuu dembiile yahay waxaa dhici karta in Canada lagaba musaafuriyo.
3. Sharciga qoyska wuxuu qeexayaa inuu dumarka soo haajiray, ama qaxootiga ah amaba Canada ku lahayn sharci lagu aqoonsado, ay leeyihiin xuquuqda iyo wajiibaadka ay leeyihiin dumarka ku dhashay Canada gudaheeda. Waxaad maxkamadda horkeeni kartaa dacwad ah inaad carrurta xannanadooda u gacan bannaanato, awood aad ku aragto lagu siiyo iyo masariif la siiyo iyada iyo carrurteedaba. Haddi aad dalbato kala tagid, waxaad maxkama-

dda ka codsan kartaa in lagu xukmiyo qeyb ka mid ah hantida qoyska uu leeyah hah markaad kala tegtan.

<http://www.onefamilylaw.ca/en/familylawissues/>

4. Haddii aad tahay waddani Canadiyan ah, haddii aad leedahay degganansho iyo sharci joogto ah ogoow lagaama eryi karo Canada ayadoo sabab lagaaga dhigayo xaaladda cadaadis aad ku nooshahay, xatta haddi uu qofka cadaadiska kugu hayo uu yahay qofka kafaalad qaaday imaanshahaaga Canada. Haddi aad haysato sharci joogitaan ku meel gaar ah ama aadan haysan sharci joogitaan rasmi ah la xiriir Waddani-nimada iyo Socdaalka Canada (Citizenship and Immigration Canada), ama la xiriir qareen ku caawina sababtoo ah waxa dhici karta inaad fursad u hesho codsi degganaansho sharciyeysan. Waxaad xaq u leedahay sir-hayn arrintaada marka aad la xiriireyso saraakiisha.

Warar intaa ka tifaftiran, fadlan la xiriir websaayt-ka Caddaalad Kanada:

<http://www.justice.gc.ca/eng/pi/fv-vf/about-aprop/index.html>